

**XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 17 ee 1da Maarso 1988,**  
Heshiis Goboleed ku saabsan dhowritaanka Bey'adda  
Badda Cas, Gacanka Cadmeed iyo Brotokoojka la socda.

**MADAXWEYNAHA JDS**

**MARKUU ARKAY:** Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;  
dhowritaanka Bey'adda Badda iyo la-dagaallanka wasa.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Baahida weyn ee loo qabo  
kheynta lagala kaashto Dawladaha deriska ah;

**MARKUU KU QANCAAY:** In sida ugu habboon oo ula-  
jeeddadan laga gaari karaa ay tahay iyadoo la meelmarayo  
Heshiiska ka dhexeeya Dawladdo ku yaalla Badda Cas iyo  
Gacanka Cadmeed ee iska kaahsanaya la dagaallanka wa-  
sakhaynta ka timaadda saliidida la shito iyo maaddooyinka  
khatarta leh;

**MARKUU DHEGEYSTAY:** Gojaha Wasiirrada.

**WUXUU SOO SAARAYAA**

**Xeerka soo socda:**

**Qod. 1aad**

**MEELMARIN**

Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya waxay meel-  
marisay Heshiis Goboleedka ku saabsan dhowritaanka Bey'-  
adda Badda Cas, Gacanka Cadmeed iyo Protocol la socda ee  
ku saabsan iskaashi Goboleed la dagaallanka wasakhaynta  
ka timaadda saliidida la shito iyo Maaddooyinka khatarta  
leh.

**Qod. 2aad**

**AWOOD SIIN**

Wasiirka Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Gaadiidka  
Badda wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro Xeer Hoosaad  
ula jeeddadiisu tahay in si habboon loogu fuliyo arrimaha  
Heshiiska iyo Protocolku ka hadlayaan.

**Qod. 3aad**

**DHAQANGAL**

Xeerkanj wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Ma-  
xaweynaha JDS.

Muqdisho, 1 Maarso 1988.

**MADAXWEYNAHA JDS**

(Maxamed Siyaad Barre)